



## Ujeeddo: Baahin Shaqo Garsoorenimo:

*Nooca Shaqada:* Garsoorayaal

*Goobta Shaqada:* Maxkamaddaha Darajada Koowaad & Labaad

*Tirada Shaqooyinka Banaan:* 30 Garsoore

*Taariikhda qabashada codsiyadu xirmayaan:* 17/08/2023

### Hordhac:

Garsoorku waa hay'adda Qaranka ugu xilsaaran ilaalinta, isku xukunka iyo ku dhaqanka sharciga, dhawrista xuquuqda aadanaha, xallinta cabashooyinka u dhaxeeya dadweynaha ama muwaadiniinta iyo hay'adaha dawliga ah, sidoo kale garsoorku wuxuu u xilsaaran yahay ciqaabta iyo anshax marinta dambiileyaasha. Taas macnaheedu waa in garsoorku mas'uul ka yahay guud ahaan caddaaladda waddanka. Garsoorku waxa uu u taagan yahay u adeegidda muwaadiniinta iyo dadka kale ee daggan dalka, isagoo ka shaqeeya sidii ay u heli lahaayeen adeeg caddaaladeed oo ay aasaas u tahay hufnaan, eex la'aan, dhexdhexaadnimo oo ay fulinayaan adeegeyaal daacad ah, ammaano leh, karti iyo hufnaan leh, shaqo yaqaan ah aqoonna u leh shaqada ay qabanayaan.

Si haddaba loo xaqiijiyo ujeeddada garsoorku u taaganyay ee sare ku xusan loona haqab-tiro baahida ka jirta maxkamadaha derajada koowaad iyo darajada labaad ee ah yaraanta garsooreyaasha ka hawl-gala maxkamadahaas, Garsoorka Gobolka Banaadir wuxuu qaadanayaa tiro garsooreyaal ah si loo dardargeliyo adeegga garsoorku u fidiyo bulshada soomaaliyeed guud ahaan .

### Waajibaadka Garsooraha:

1. U gudashada shaqada garsoorenimo si hufan, madaxbannaan, dhexdhexaad ah, kuna dheehan tahay howlkarnimo, sinnaan iyo caddaalad.
2. U hoggaansanaanta, dabaqidida iyo ilaalinta sarraynta sharciga mar kasta iyo xaalad kasta cabsi iyo eex la'aan.
3. Socodsiinta, Maamulidda, dhegeysiga, ka garnaqidida iyo go'aan ka gaarista. dacwadaha si waafaqsan sharciga.
4. Xaqiijinta in dhinacyadu helaan fursado siman maxkamadda horteeda.

5. Qiimeynta iyo go'aan ka gaarista caddaymaha maxkamadda la hor keeno.
6. Samaynta cilmi baarisyo la xiriiraa dacwadaha horyaala garsooraha iyo sharciyada uu dabaqayo.
7. U socodsiinta dacwadaha si aan daahis laheyn.
8. Ugu adeegidda bulshada sida ay ku jirto danta caddaaladda oo kaliya.

### **Shuruudaha qofka garsooraha loo qaadanayo:**

1. Waa in uu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhimirkiisu dhan yahay, balwadna lahayn, aan gelin dambi maxkamaddi ku xukuntey si kama dambays ah, da'diisuna ka yarayn 30 sanno.
2. Waa in uu ka heysto Jaamacad la aqoonsan yahay, ugu yaraan shahaadada heerka koowaad dhanka sharci ga ah.
3. Waa in uu faham fiican ka haysto shareecada islaamka, dastuurka dalka iyo qawaaniinta kale ee dalka u yaala gaar ahaan xeerarka ciqaabta iyo madaniga soomaaliya.
4. Waa in uu leeyahay ugu yaraan hal sanno oo waayo-aragnimo ku shaqaynta sharciga ah.
5. Waa in uu leeyahay anshax suubban iyo sumcad wanaagsan bulshada dhexdeeda;
6. Waa inuu aqoon fiican u leeyahay adeegsiga aaladda computer-ka.
7. Waa in uu leeyahay xirfad sare oo xallinta khilaafaadka.
8. Waa in uu qori karo kuna hadli karo luqadaha (Af-soomaali, Carabi iyo Ingiriisi)

### **Sida loo soo codsanayo shaqadan:**

Qofka danaynaya shaqadaan waxa uu ku soo diri karaa codsiyigiisa shaqo, macluumaadka taariikh nololeedkiisa [CV] iyo nuqul kamid ah shahaadooyinkiisa jaamacadeed, E-mail kan:

[vacancy@supremecourt.gov.so](mailto:vacancy@supremecourt.gov.so) , iyada oo la buuxinayo foomka la socda. Qabashada Codsiyada shaqo waxay xirmaysaa 17/08/2023.